

XUQUUQDA DHALLINYARADA AY KU LEEYIHIIN DADKA WAAWEYN

Warqadahaan waxaasoo saaray iskaashiga u dhaxeeya hay'adda isuduwidda qaxootiga Genevaiyo Rugta Sharci dejinta ee jaamacadda Geneva. Waxay ku wajahan yihiin caruurta aan qaan gaarin iyo kuwa qaan gaarka ah ee aan lala socon oo ku nool Geneva. Waxay uyeedadooda tahay in ay ku wargeliyaan sida ugu fudud xuquuqaha qaarkood ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo faahfaahin , waxaad kala socon kartaa buug-yaraha ku yaal xuquuqda loo dajiyay dhallinyarada muhaajiriinta aan lala socon ee Rugta Sharciga.

Marka aad tahay qof yar, waxaad xaq u leedahay taageero gaar ah iyo tallaabooyin ilaalin oo kala duwan. Laakiin ficil ahaan, mararka qaarkood way adag tahay iyadoo ay ku xiran tahay gobolka aad ku nooshahay ama sharciga aad ku joogtid. Dad kala duwan ayaa markaa ku daryeeli doona inta aad da'yar tahay. Dadkani waxay leeyihiin doorar kala duwan mana laha awood go'aan qaadasho oo ku saabsan go'aankamagangalyadaada. Go'aankan waxaa iska leh heer federaal ee ma ahan heer goboleed (cantonal).

Shaxda hoose, waxaad ka heli doontaa liiska dadka kala duwan ee adiga kuu jooga iyo doorkooda iyo mas'uuliyadda ay kuu haayaan. Waxaad sidoo kale ogaan doontaa waxa ay yihiin xuquuqyada aad ku leedahay dadkaas iyadoo tusaalooyin qaarna aad ka heli kartid.

Cinwaanno waxtar leh oo muhiim ah

Adeegyada sharciga oo joogtada ah , haddii aad tahay magangalyo doon ama qaxooti

Adeegyada sharciga oo joogtada ah iyo bulshada,haddii aadan lahayn sharci

Qaar kale oo adeeg sharci ah oo aad ka heli kartid macluumaad iyo talooyin:

Adeegyada sharciga oo joogtada ah , MNA/RMNA

Adeegyada sharciga oo joogtada ah ee ardayda

Taageerooyin kale oo suurtagal ah :

Ururada dhexdhexaadiyeyaasha dhaqamada kala duwan (AMIC); waxay taageero siiyaan dhallinyarada magangalyo doonka ah oo aan lala socon (RMNA) ama lala socdo, si loogu fududeeyo is dhexgalka bulshada ee Geneva. Waxay daryeelaan mashruucaqoysaska (familles)-(isu gudbiya)-relais.

Ku-tiirsanaanta : waxay ka taageertaa kuwa RMNA iyo ex- RMNA tababarkooda waxbarasheed iyo xirfadeed.



